



Waaxda Booliiska ee Bloomington ayaa kulan furan qabatay Maayo 2022.



Dhismaha Xarunta Dab damiska #4, 4201 West 84th Street, Sibteembar 2022.

**D**awlada Hoose ee Bloomington waxay qaban doontaa dhagaysi dadwayne si ay u dhagaysato fikradaha la xidhiidha canshuurta lasoo jeediyay ee 2023 iyo miisaaniyada Isniinta, Diseembar 5, 6:30 pm. oo lagu qaban doono Xarunta Dawlada Hoose ee Civic Plaza, 1800 West Old Shakopee Road. Si aad u hesho macluumaadka ku saabsan sida uu qofku qaab toos ah ama qaab oonleen ah uga qaybgalo, booqo [blm.mn/cc-1205](http://blm.mn/cc-1205) ama wac 952-563-8790.


Canshuurta hordhaca ah ee Magaalada 2023 waxaa dejiyay golaha waxayna dejiyeen Sebteembar 12, 2022, lacag dhan \$75,467,883, waxayna kor u kacday 10.50% marka la eego canshuurtii 2022. Kororka ayaa xal u noqonaaya baahiyaha waawayn ee shaqaalaha iyo shaqada ee Waaxda Dab Damiska iyo Booliiska ee ee Bloomington, *arag xogta hoose ee dhanka bidix*. Lacagta canshuurta ah ee bilaha waa la yarayn karaa kahor dhaqan gelinta ugu danbaysa, laakiin lama kordhin karo. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan miisaaniyada Magaalada, oo ay kujiraan macluumaadka munaasabadaha xog aruurinta bulshada ee la qabtay xagaagaan iyo dayrta, booqo [blm.mn/budget](http://blm.mn/budget).

### WAAXDA DAB DAMISKA

- Kudar shaqaalaha sida buuxda u shaqeeya ee dab damiska ee 2023 si xal loogu helo dhibaatooyinka waawayn ee ka jira shaqaalaha loona bilaabo ka guurista shaqaalaha badanaa mushaharka ku qaabta marka shaqo loogu waco, ee waaxda shaqada nuska shaqaysa looguna guuro qaabka isku dhafan ee shaqaalaha buuxa iyo kuwa gelinka shaqeeya.
- Badelida iyo casriyaynta xarumaha dab damiska si loo buuxsho baahiyaha kahortaga dabka ee bulshada.
- Bixinta lacagta qalabka, tababarka iyo agabka loo baahan yahay.



### BALAAARINTA CANSHUURTA LASOO JEEDIYAY EE 2023



- Booliska - 33%
- Dab demiska - 32%
- Adeegga Daynta (inta badan kordhinta waxaa loogu talagalay Xarunta Dab damiska ee #4) = 15%
- Adeegyada Bulshada - 8%
- Beeraha iyo Jardiinooyinka - 5%
- Shaqooyinka Dawlada - 4%
- Hormarinta Bulshada - 3%

### WAAXDA BOOLIISKA

- Ku kordhinta labo sarkaal booliis ah si xal loogu helo shaqada badan ee ciidanka hadda qabtaan iyo si loo buuxsho heerarka shaqaalo yarida.
- In lagu daro shaqada tababarka iyo isku duwaha tayada si xal loogu helo caqabadaha ka jira shaqaale qorista iyo haynta shaqaalaha.
- Kordhinta lacagta qalabka kaamirada, tababarka iyo agabka ee loo baahan yahay.

El consejo municipal de la ciudad de Bloomington convocará una audiencia pública para escuchar de usted sobre la propuesta de recaudación de impuestos y el presupuesto de la ciudad para el año 2023, el día lunes, 5 de diciembre a las 6:30 p.m. Para más información en español, por favor visite la página de la red del internet [blm.mn/property-tax](http://blm.mn/property-tax)

Dawlada Hoose ee Bloomington waxay qaban doontaa kulan lagu dhegeysano dadwaynaha Isniinta, Diisambar 5 markay tahay saacada 6:30 fiidnimo si lagaaga dhegaysato adiga arrinta ku saabsan cashuur saarida iyo miisaaniyada Magaalada 2023 ee la soo jeediyay. Waxii macluumaad dheeraad ah ee ku qoran AF Soomaali, fadlan booqo [blm.mn/property-tax](http://blm.mn/property-tax)

Hội Đồng Thành Phố Bloomington sẽ tổ chức một buổi điều trần công cộng vào thứ Hai, ngày 6 tháng Mười hai, lúc 6:30 giờ tối để nghe ý kiến của quý vị về đề xuất ngân sách và vấn đề đánh thuế năm 2023 của Thành Phố. Để tìm hiểu thêm bằng tiếng Việt, vui lòng truy cập trang mạng [blm.mn/property-tax](http://blm.mn/property-tax)